Shuruucda Washington ee Xadgudubka Caruurta iyo Dayacaada

Dukumentigani waxa loogu talo galay in lagu bixiyo waxbarashada shuruucda muhiimka ah Washington ee xadugudbka iyo dayacaada caruurta Revised Code of Washington (iyo tixraacyada Xeerka Dib loo Eegay eee Washington, RCW) Washington Administrative Code (iyo Xeerka Maamulka Washington, WAC).

Anshaxa jidheed ma caadibaa?

Haa, anshaxa jidheed ee cunuga, oo ay kujiraan isticmaalka suuro galka ah ama ciqaab jidheed, looma tixgalinayo xad gudub ama sharci daro marka ay suuro galka tahay iyo dhexdhexaadinta iyo marka ay la dhibanyihiin waalidka, macalinka, ama masuulku iyadoo ujeedadu tahay in la edbiyo ama la saxo cunuga. Da'da, baaxadda, iyo xaaladda canugga, iyo meesha dhaawac kasta la gaadhsiiyay waa in la tixgeliyaa marka la go'aaminayo in dhibaatayntа jidhka uu yahay mid macquul ah ama dhexdhexaad ah. Waxyaabaha kale waxa kujiri kara heerka koritaan ee cunuga iyo dhaqanka ilmaha ee adeecis la'aanta sharciga. Caqiidada waalidka ee ah inay lama huraan tahay in la ciqaabo cunugga qiil ka dhigta ama isticmaala xoog, xad -dhaaf ah ama aan macquul ahayn oo ka dhan ah cunugga. Isticmaal kasta oo awood uu u isticmaalo qof kale waa sharci daro hadii kale oo ay suuro galtahay iyo dhexdhexaadintu waa loo ogolyahay waalidka ama masuulka iyadoo ujeedadu tahay in ilmaha la edbiyo ama la saxo.

- RCW 9A.16.100: **https://apps.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=9A.16.100**
- WAC 110-30-0030: **https://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-30-0030**

Waa maxay waxa aan dhexdhexaadinta ahayn ama awooda jidheed ee aan macquulka ahayn ama loo tixgalin karo ku xadgudub jidheed?

Xad gudubka jidheed micnaheedu waxa weeyi inaad si ula kac ah cunug dhibaato jidheed ugu gaysato ama dhaqan aan wanaagsayn oo aad kula dhaqanto ilmaha caafimaadkiisa jidheedna wax yeeli kara, farxadiisa, ama badqabkiisa. Waa wax ku jiri kara, lakin aan ku xadidnayn, talaabooyinka sida:

(a) In la tuuro, la laago, la gubo, ama ilmaha la jarjaro;

(b) Inaad ka garaacdo cunuga cumaacunta;

(c) Ruxitaanka ilmaha ka yar da'ahaan sadex sano;

(d) Dhibaataynta neefsashada ilmaha;

(e) In loogu hanjabo ilmo hub dilaa ah; ama

(f) Samaynta fal kale kaasoo ay u dhawdahay inuu sababo ama dhibaato u gaysanaya xanuun sii soconaya ama calaamdo si kumeelgaadh ah usoo gaadha ama waxa uu halis ku yahay ilmaha caafimaadkiisa, farxadiisa ama badqabkiisa.

- RCW 9A.16.100: **https://apps.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=9A.16.100**
- WAC 110-30-0030: **https://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-30-0030**

Maxaa loo tixgaliyaa dhibaatayn xaga galmada ah?

Xadgudubka galmada waxaa loola jeedaa in la sameeyo ama la oggolaado in lagu sameeyo wax kasta oo xadgudub galmo ah oo ka dhan ah ilmaha sida ku qeexan xeerka ciqaabta. Taabasho kutalagal ah, ama si toosa haloo taabto ama dharkiisa hala taabto, ee xubnaha taranka ama meelaha kale ee dareenka leh ee ilmaha ama ogolaanshaha, samaynta, ku dhiirashada, dhiirigalinta, caawinta, ama waxkale oo ku sababaya ilmaha in lagu sameeyo taabasho xubnihiisa taranka ama meelaha kale ee dareenka leh iyadoo ujeedadu tahay doonis galmo uu karabo qofka taabanaya ilmuhu, ilmaha, ama gacanta sadexaad. Waalidka ama masuulka ilmaha, qofka ay ogolaadeen waalidku ama masuulka si uu u siiyo daryeel ilmaha, ama qofka bixinaya adeegyada caafimaad ahaan la aqoonsanyahay ee ilmaha, wuu taaban karaa qofkaasi xubnihiisa taranka ama meelaha kale ee xasaasiga ah isagoo ujeedadiisu tahay inuu nadiifiyo meelahaas, ama siiyo daawayn ama baadhis caafimaad.

WAC 110-30-0030: **https://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-30-0030**

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Waa maxay la tacaamulka aan saxda ahayn ee galmadu?

La tacaamulka aan saxda ahayn ee galmadu waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, ka -ganacsiga xubnaha taranka iyo ka -faa'iidaysiga galmada ee ganacsiga maadaama shuruudahaas lagu qeexay sharciga oo ay ku jiraan tallaabooyinkaas sida oggolaanshaha, ku -qasbidda, dhiirri -gelinta, caawinta, ama haddii kale keenaya in ilmuhu ka qaybgalo mid ama in ka badan kuwan soo socda:

(a) Hawl kasta oo galmo oo dhacda marka la siiyo ama uu helo shay uu siiyay qof ugu talagalay inuu galmo ku sameeyo;

(b) Galmo ahaan loo fahmi karo, la xidhiidha galmo, ama hawlo sawiro galmo la xidhiidha ama muuqaalo galmo laga duubo, ama si electaroonik ah loo gudbiyo;

(c) Galmo ahaan loo fahmi karo, la xidhiidha galmo, ama qayb ka ah hawlo la xidhiidha muuqaalo galmo iyadoo qayb ka ah hawsha tooska ah ama ka faa'daysiga qanaacada galmo ee qof kale.

WAC 110-30-0030: **https://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-30-0030**

Miyaan kaga tagi karaa ilmahayga hadii uu dhibaato galmo loo gaysto, xataa haday tahay mudo gaaban?

Maya, kaga tagista cunuga daryeelka xadgudube galmo ficil xun ilaa maxkamad u ogalato xadgudbaha inuu la yeesho xiriir aan la kormeerin caruurta, ama xadgudbaha loo ogalaado iuu la yeesho xiriir aan la kormeerin cunuga su'aashu ka taagan tahay ee qorshaha la midowga qoyska, oo ay ansixisay maxkamadi, waaxda sixitaanka qaladaadka, ama waaxda adeegyada bulshada iyo caafimaadka iyadoo la raacayo waaxda siyaasadaha.

Qofka danbi lagu helo inuu kaga tagay caruur qof xadgudub galmo sameynaya haddii qofku yahay (a) waalidka cunuga; (b) lagu aaminay ilaalinta cunuga; ama (c) loo shaqaaleysiiyey inuu siiyo cunuga daruuriyaadka asaasiga ah ee nolosha, uu kaga tago cunuga daryeelka ama ilaalinta qofkale oo aan ahayn waalid, masuul, ama ilaaliye sharciya oo cunuga, isagoo og in qofka la diwaangaliyey ama looga baahan yahay inuu isku diwaangaliyo xad gudbe galmo sharciga gobolka, ama sharciga gobol kale oo leh shuruudo la mida, waayo xadgudubka galmo ee ka dhanka ah cunuga.

RCW 9A.42.110: **https://apps.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=9A.42.110**

Waa maxay dacaayad ama si xun ula dhaqmid?

Dayacaad ama si xun ula dhaqmid macneheedu waa ficil ama ku guul daraysasho ficil, ama saameyn guud oo anshaxa, hab-dhaqanka, ama ficil la'aan dhanka waalidka cunuga, masuulka sharci, masuulka, ama daryeel bixiyaha oo muujinaaya tixgalin xumo weyn oo cawaaqibta cunuga ah oo keenaya khatar cad oo ku waajahan caafimaadka, ladnaanshaha ama badqabka cunuga.

(a) Marka la tixgalinaayo in khatar cad jirto hada, cadeynta waalidka ee xadgudubka ayaa qodob ka noqonaysa oo aad loo tixgalinayaa.

(b) Xaqiiqda in walaaluhu wadaagaan sariir maaha, iyada lafteedu, dayacaad ama si xun ula dhaqmid.

(c) Faqriga, hoy la'aanta, ama ku dayacista rabshadaha gudaha ee uu bilaabay qof aan ka ahayn cunugu maaha, iyaga laftoodu, dayacaad ama si xun ula dhaqmid.

(d) Cunugu maaha inuu ka cowdo dhaawac muuqda ama jidheed ama dareen oo uu ku jiro xaalado ku keenaya khatar cad caafimaad, ladnaanshaha ama badqabka cunuga.

(e) Dayacaad ama si xun ula dhaqmida waxa ku jiri kara, aanse lagu koobin mid ama in ka badan oo kuwan soo socda ah:

  (i) Ku guuldaraysashada in la siiyo cunto ku filan, hoy ku filan, kormeer ama daryeel caafimaad oo ku haboon caafimaadka, ladnaanshaha ama badqabka cunuga, si guul daraysashadu aanay u keenin cawaaqib xun cunuga una abuurin khatar cad oo caafimaadka, ladnaanshaha, ama badqabka cunuga ah;

  (ii) Ficilada, Ficil la'aanta, ama ka tagista natiijooyinka ka dhashay dhaawac ama khatar dhaawac oo jidheed, dareen, iyo/ama maskaxeed oo cunuga ah, ooo keenaya cawaaqib abuuraysa khatar cad oo caafimaadka, ladnaanshaha ama badqabka cunuga ah;

  (iii) Saameynta guud ee anshaxa, hab-dhaqanka, ama ficil la'aanta waalidka ama masuulka daboolaya baahiyo jidheed, dareen ama korniin ee cunuga oo muujinaaya tixgalin xumo weyn oo cawaaqibta cunuga ah oo keenaya khatar cad oo ku waajahan caafimaadka, ladnaanshaha ama badqabka cunuga;

(iv) Saameynta xanuun jiraya oo dhanka waalidka ama masuulku inuu guto shaqooyinka asaasiga ah, waajibaadka, ama shaqooyinka sababaya dhaawac ama khatar dhawaac weyn oo jidheed, dareen, ama korniin oo cunuga, oo keenaya cawaaqib abuuraysa khatar cad oo caafimaadka, ladnaanshaha ama badqabka cunuga ah.

WAC 110-30-0030: **https://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-30-0030**